Ontario

# Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska.

## Qorshaha amaanka haweenka sida xun loola dhaqmey

Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska.

*Lamaanehaaga si xun ma kuula dhaqmaa, laakiin ma ogid miyaa siddii aad u badbaadin laheyd naftaada ama aad uga tagi laheyd?*

*Qofka warqaddan ku siiyey, wuxuu ka walwalsan yahay amaankaada, waxaa laga yaabaa in uu dareemey astaamo muujinaaya in ay suuragal tahay in ay jirto dhaqan ximi. Waxa ay doonayaan in aad ogaatid in ay ku taageersan yihiin, inkastoo, aadan waxba ka qaban karin waxyeelada ama rabshadaha lamaanehaaga, waxaa laga yabaa in aad kordhin kartid amaankaada iyo midka carruurtaadaba.*

*Warqadani waxey sharxeysaa ficilada aad qaadi kartid si aad u ilaaliso amaankaada iyo amaanka caruurtaada, waxey kaloo sharxeysaa sidii aad u kordhin laheyd qorshe aad uga tagi laheyd.*

*Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska waxey u ololeynayaan sidii ay sare ugu qaadi lahaayeen wax ka ogaanshaha astaamaha haweenka sida xun loola dhamo si dadka halista ku jira ay u helaan taageerada ay u baahan yihiin.*

*Qof kasta oo bulshada ka mid ah wuxuu leeyahay kaalin uu ku caawin karo sida looga hortago haweenka sida xun loola dhaqmo. Waxaad la xiriiri kartaa ururada bulshadaada si ay kuu caawiyaan.*

*Ololahani waa iskashi ka dhaxeeyo Dawlada Ontaariyo, Maamulka Haweenka Ontaariyo iyo kooxda quburaha kuna xeel dheer arimaha Jiiranka (deriska), Saaxiibada, iyo Qoysaska, waxeyna soo marsiiyaan xarunta cilmi baarista iyo waxbarashada la xiriirto rabshadaha ama dhibaatooyinka loo geysto haweenka iyo carruurta.*

## Helida qorshe amaan leh.

Qorshaha amaanka waa mudnaanta ugu sareyso, haddii aad dooratid in aad guriga joogtid ama aad ka tagtid. Sameynta qorshe amaan wuxuu tilmaamayaa ficilada aad kor ugu qaadeysid amaankaada iyo midka carruurtaada.

Hoos waxaa ku qoran dhowr soo-jeedin laga yaabo inay ku caawiyaan, hal ficil markiiba qaad, kana bilow midka kuugu sahlan isla markaana kuu amaan badan.

### *Badbaadinta naftaada markii aad la nooshahay qofka sida xun ula dhaqmo haweenka ama dumarka:*

- Qof aad ku kalsoon tahay ama aad aaminsan tahay u sheeg sida xun oo laguula dhaqmay.
- Ka fikir xoog intee la-eg uyuu horey u isticmaaley lamaanehaaga, tani waxey kaa caawineysaa in aad saadaalisid ama ogaatid khatarta kugu soo fool leh ama kugu soo socoto adiga iyo carruurtaadaba markii aad ka tagtaan.
- U sheeg carruurtaada in si xun ula dhaqanka uusan sax ama xaq ahayn, xataa marka qof ay jecel yihiin uu yahay mid si xun u dhaqma. U sheeg in dulleysiga ama si xun ula dhaqanka uusan qaladkaada aheyn ama qaladkooda aheyn, in ayaga iyo adiguba sababin. Bar in ay muhiin tahay in amaanka la ilaaliyo marka ay jirto si xun ula dhaqan ama dulleysi.
- Qorshee meeshii la tagi lahaa markii xaaladd deg-deg ah jirto. Bar carruurtaada sida loo helo taageero ama caawin, bar in aynan idin soo dhex gelin haddii ay jirto rabshad adiga iyo lamaanehaaga idinka dhaxeeyso. Qorshee ama bar ereyo baaq ah in ay raadsadaan caawino ama isaga tagaan meesha.
- Ha u cararin meesha ay carruurtu joogto si aanu ninkaagu u dhaawicin carruurta.
- Qorshee sidii aad amaan guriga uga bixi laheyd, mar walba wada sameeya adiga iyo carruurtaada si aad u barataan qorshahaas.
- Weydiiso Jiiranka (deriska), saaxiibada iyo qoysaska inay wacaan booliska haddii ay maqlaan qeyladhaan ama dhawaaq u muujinaya si xun ula dhaqan iyo inay carruurta kaa hayaan haddii ay jirto xaaladd deg deg ah.
- Haddii muranka sii badanayo, waxaad u dhowaataa meel aad si sahal banaanka ugu bixi karto. Ha aadin qolka ama meel laga heli karo wax hub noqon kara sida meelaha (jikada, garaashka iyo musqusha/suuliga).
- Haddii lagu dilaayo ama lagu dhaawacaayo, gacmaha iska xiji wajiga iyo agagaarkiisa, oo ka ilaalso wajiga iyo madaxa inaysan wax kaa gaarin, markii aad gacmaha wajiga iska xijineyso faraha isku dheji. Ha xiran safaleeti ama dahabka dhaadheer.
- Baabuurkaaga gadaal gadaal u dhig marinka garaashka, shidaalna ama baasin ha ku jiro.
- Ku qari furayaashaada, telefoonka gacanta iyo lacag meel u dhow dhinaca aad ka baxaysid.
- Waa in aad haysataa liis nambaro teleefoon oo aad taageero u wacan kartid. Wac booliska haddii ay xaalad deg deg ah jirto. Hoyga ama booliska kugu dhow ayaa laga yaabaa in ay kuu sameeyaan badhanka gurmadka/telefoonka gacanta.
- Waxaad hubsataa in hubka iyo rasaastu ay qarsoon yihiin ama gurigaada aad ka saarto.

## U diyaargarow tegid.

*Waa kuwan dhowr soojeedin, markii aad dooneysid ama qorsheyneysid in aad ka tagto:*

- La xiriir booliska ama hoyga haweenka ee kugu dhow. Shaqaalaha la socodsii in aad dooneysid in aad ka tagto xaaladda dhaqan xumo ama duleysiga aad ku jirtid, waxaana weydiisataa in ay kugu caawiyaan qorshe amaan ah. Weydiiso in aad aragtid sarkaalka khibrada u leh haweenka sida xun loola dhaqmey ama xaaladaha duleysiga. (Warka ama aqbaarta aad u sheegto booliska waxaa laga yabaa in ay keento in dembi lagu soo oogo lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey ama kuu duleystey).
- Haddii dhaawac ku gaaray, u tag dhaqtarka ama gargaarka deg deg ah, una sheeg waxa dhacay, u sheeg in ay diiwaan geliyaan booqashadaada.
- Ururso dukumintiga muhiinka ah: warqadaha aqoonsiga, kaarka bankiga, warqadaha xisaaabadka ee la xiriira hantida qoyska, warqaddii ugu dembeysey ee daqliga canshuur celinta Kanada, furayaasha, dawooyinka iyo masawirka lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey iyo carruutaada, Basabooradooda, kaararka caafimaadka, cinwaanka gaarka ah / buuga telefoonka, telefoonka gacanta iyo warqadaha sharciga ah sida (warqadaha immigareyshanka ama deganaasho, warqada ijaarka guriga ama la haansho guri, warqada maxkamada oo amreyso in uu kaa fogaado, iyo warqadaha damiinta).

## U diyaargarowga ka tagidda

- Haddii aadna gurigaaga dhigan karin waxyaabahaan cabsi aad ka qabto in uu ninkaaga heli doono, ka sameyso koobi, una dhiibo qof aad aaminsan tahay. Hoyga haweenka kuugu dhow xataa wey kuu haynayaan.
- La tasho garyaqaankaada. Hayso wax ka marqaati kici karo ama cadeynaayo nabarada ku gaarey (sida masawiro), qoro ama dhigo-haay rabshadaha dhaco, taariiqda, waxa dhacey, handadaada iyo marqaatiyadada.
- Meel wada dhigo masawirada, dahabka iyo alaabaha qiimaha leh sidoo kale alaabta carruurta ku ciyaaraan ama ay jecel yihiin.
- Diyaarso qof kuu daryeesha xawaankaada gurijooga si ku meel gaar ah inta aad meel degaysid. Hoyga haweenka ayaa laga yabaa inuu kaa caawiyo arintani.
- Xasuuso in aad tirtirtid nambarkii telefoonka ugu dambeeyey ee dirtey, si aad uga hortagtid in uusan dib u wacin.

## Ka tagista dulmiyaha ama xumeeyaha

*Waa kuwan dhowr soojeedin oo ku saabsan amaankaada qaas ahaaneed markii aad tageysid.*

- Codso in booliska ku raaco ama weydiiso saaxiib, deriska ama qof ehel ah. Marka aad guriga ka tageysid.
- La xiriir hoyga haweenka ee kuugu dhow. Waxaa laga yaabaa in ay meel kuu gaar ah oo amaan ah ku siiyaan inta aad tegi lahayd meel uu lamaanehaagu garanayo.
- Ha u sheegin lamaanehaaga in aad ka tageysid. Si deg deg ahna u bax.
- Waa in aad qorshe labaad sameysataa haddii uu ogaado meeshaad tegeysid.

## Ka dib marka aad ka tagtid

*Waa kuwan dhowr ficil aad qaadi lahayd markii adiga iyo lamaanehaaga uu midkiin xiriirka gooyo*

- Booqo xarunta booliska ee kuugu dhow, weydiisana in aad la hadashid sarkaal ku takhasusay haweenka sida xun loola dhaqmey dacwooyinkooda.
- Ka fikir in aad codsato amar maxkamadeed in uusan agtaada imaan, waxey kaa caawineysaa in uu kaa fogaado adiga iyo carruurtaada.
- Waxaad booliska siisaa nuqul wixii amar maxkamadeed ah.
- La tasho garyaqaan ama hay'da sharciga ka caawinta (legal aid clinic) sidaad adiga iyo carruurtaada isku badbaadin laheydeen. U sheeg garyaqaankaada haddii ay jirto keys dembi maxkamadeed oo weli socda.
- Ka fikir in aad bedeshid meelihii aad la wada xiriiri jirteen adiga iyo lamaanehaaga aad kala tagteen.
- Codso in telefoonka nambarkaada lagu daabicin telefoon buuga magaalada, aad ka diiwaangashanayn. Gasho kan nambarka ku soo waca laga arko, qari taleefoon nambarkaaga marka aad dirsaneysid ama waceysid meel kale.
- Hubi in iskuulka carruurta iyo xarunta xanaanada carruurtu ay ka war qabaan xaaladaada, siina koobi wixii dokumenti ah ee la xariira xaladaada.

- Sido ama hayso sawirka lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey, ama kuu duleystey iyo sawirada carruurtaada.
- Ka codso deriska in ay carruurta kuu ilaaliyaan markii ay jirto xaaladd deg deg ah iyo in ay wacaan booliska haday arkaan lamaanehaaga sida xun kuula dhaqmey.
- Fiiro gaar ah u yeelo shaqada, guriga iyo bulshada dhexdeeda. La socodsii kormeeraha shaqadaada xaaladdaada.
- Ka fikir meelaha iyo hababka uu lamaanehaaga horey ka garan karo, iskuna dey in aad bedeshid. Tusaale: Isticmaal dukaamo kale iyo masaajido kale ama meelaha cibaadeysiga.
- Haddii aad dareentid amaan daro markii aad kaligaa socotid, weydiiso deriska, saaxiibada iyo qaraabada in ay ku raacaan.
- Ha ku noqon gurigii aad ka soo tagtey iyaadoo aan booliska kula socon. Haka hor imaan ninka sida xun kuula dhaqmey.

## Warfaafin

Telefoonka deg dega ee lagu caawiyo haweenka sida xun loola dhaqmey waa 1-866-863-0511 waana 24 saacadood qad furan. TTY waa 1-866-863-7868 waana qadka telefoonka caawiyo dhibaatooyinka haweenka sida xun loola dhaqmey ee Ontaariyo. Adeegani waa qarsoodi ama sir, qof wax lagaaga sheegayo ma jirto. Toll-Free nambarka waa lacag la'aan ama free. Adeegyada waxaa bixiya dad ku hadli karo luqado kala duwan ilaa iyo154 luqadood.

Shaqalaha qadka (leynka) gargaarka deg dega ahi waxey kaa caawin karaan qorshe amaanka dheeraad ah iyo waxayna kuu heli karaan meel hoyga haweenka ama kugu xiriirinayaan adeego kale oo caawinaadeed oo ka jira bulshadaada.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan adeegyada caawina haweenka sida xun loola dhaqmey ama la wax yeeleeyey booqo website-kan: www.awhl.org Haddii aad ka walwalsan tahay amaankaada gaar ahaaneed waco booliska.

*Dadka reer Ontaariyo badankoodu waxay masuuliyad iska saaraan sidii ay u yarayn lahaayeen haweenka sida xun loola dhaqmo ama la duleystey… iyagoo aqoonsanaayo, waa talaabada ugu horaysa. Muhiimad weyn sii astaamaha digniinta. Wixii faahfaahin dheeraad ah booqo: www.neighboursfriendsandfamilies.on.ca*

Haddii aad dooneysid in luuqada faransiiska laguugu shaqeeyo fadlan la xariir Femaide oo laga heli karo telefoonka lacag la'aanta ah ama bilaashka ah ee numberkiisu yahay 1-877-336-2433. Haweenka dhagooleyaasha ah amaba uu dhibaayo maqalka waxay la soo xariiri karaan qadka caawinaada oo talefoonka numberkiisu yahay 1-866-860-7082. Labadaan talefoonba way xafidan yihiin oo sirtaada lama ogaan karo.

Haddii aad u baahan tahay xog ama faahfaahin intaa ka badan iyo hawlaha kale oo ay qabato Femaide fadlan booqo shabakadan: www.briserlesilence.ca